MN DEPARTMENT OF HEALTH

# Cudurka Fayraska Powassan

## Waa maxay cudurka fayraska Powassan?

Fayraska Powassan waa *flavivirus* shilinta laga qaado kaasi oo la xiriira fayrasyada kaneecada qaarkood sida fayraska West Nile. Fayraska waxaa loogu magaca-daray Powassan, Ontario halkaasoo markii ugu horraysay la helay 1958. Laba nooc oo Fayraska Powassan ah ayaa laga helay Waqooyiga Ameerika oo ay ku jiraan fayrasyada Powassan ee nooca 1 iyo nooca 2. Cudurka fayraska Powassan ee dhakhtar daaweeyo aad ayuu dhif u yahay Minnesota iyo Maraykanka.

## Sidee dadku u qaadaan cudurka fayraska Powassan?

Dadku waxay ka qaadi karaan fayraska Powassan qaniinyada shilinta qabta fayraska. Dhammaan shilintu ma siddo fayrasyadan, dhammaan dadka ay qaniinaana ma bukoodaan. Shilintu waxay u baahan tahay inay qofka ku dhagganaato muddo kahor inta ayna cudurka keenin. Wakhtiga lama yaqaan cudurka fayraska Powassan, laakiin waxay u dhawdahay inuu ka gaaban yahay 12-24 saacadood.

Hal nooc oo kamid ah fayraska Powassan (nooca 2 ama "fayraska deer tick") waxa qaada shilinta lugaha madow (deer tick), isla markaana taasi oo faafisa cudurka Lyme, *anaplasmosis*, iyo babesiosis. Shilinta lugaha madow waxa laga heli karaa meelo badan oo geedo waawayn leh Minnesota. Shilinta lugaha madow waxay ku nooshahay dhulka meelaha dhirta leh ama meelaha kaynta badan leh. Shilintu waxay ka raadsataa wax ay ku dul noolaato dhulka ama meel udhow dhulka waxayna qabsataa marka qof ama xayawaan meesha soo maraan. Shilintu ma booddo, duusho ama kama soo dhacdo geedaha.

Gobolka Minnesota, bilaha Abriil ilaa Luulyo iyo Sebtembar ilaa Oktoobar ayaa ah kuwa khatarta ugu wayn ee in shilintu qofka qaniinto. Khatarta waxay ugu badan tahay bilaha Juun ama Luulyo sanad kasta. Shilinta lugaha madow waa wax yaryar; kuwa qaangaarka ah waxay la xajmi yihiin abuurka sisinta kuwa carruurta ahna waxay la xajmi yihiin siidhka bobiga. Iyadoo ay ugu wacan tahay xajmigooda yar, qofku ma ogaan karo in shilin qaniinsan tahay.

Nooc kale oo Fayraska Powassan ah (nooca 1) waxaa qaada faracyo shilin ah oo la mid ah kuwaasi oo inta badan quuta *woodchucks-ka* iyo dabagaallaha halkii bini-aadanka. Shilintan sidoo kale waxa laga helaa aagagga geedaha waawayn leh ee Minnesota, laakiin way yar tahay in bini-aadanka ay kulmaan.

## Maxay yihiin calaamadaha cudurka fayraska Powassan?

Dad badan oo qaba fayraska Powassan ma laha astaamo ama waxay leeyihiin astaamo fudud oo kaliya. Astaamaha fayraska Powassan caadi ahaan waxay  muuqdaan 1-4 toddobaad gudahood ee qaniinyada shilinta. Calaamadaha iyo astaamaha waxaa ka mid noqon kara:

- **Qandho**
- **Madax-xanuun**
- **Matag**
- **Daciifnimo**
- **Suuxdimo**
- **Encephalitis** (bararka maskaxda)
- **Meningitis** (bararka xuubabka ku wareegsan maskaxda iyo xangulada)

Bukaanada qaba cudur halis ah waxaa laga yaabaa inay yeeshaan astaamo muddo dheer oo xagga neerfaha ah sida mada-xanuun iyo dhibaatooyin xagga xasuusta ah. Dhimashadu waa suurtogal laakiin waxa dhif ah (qiyaastii 10% [boqolkiba toban] xaaladaha qaba encephalitis).

## Sidee cudurka fayraska Powassan loo ogaado?

Haddii qofku uu ka shakiyo cudurka fayraska Powassan, waa inay la xiriiraan dhakhtar isla

